WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA & TACLIINTA SARE

MAAJO / JUUNYO 2021

MAADDO: AF-SOOMALI

WAQTI: 2 SAACADOOD

FADLAN JAWAABAHA KU QOR BUUGGA JAWAABAHA:

QEYBTA 1AAD Goobo-geli	(20 dhibcood)
QEYBTA 2AAD Suugaan	(35 dhibcood)
QEYBTA 3AAD Naxwe	(25 dhibcood)
QEYBTA 4AAD Curis	(20 dhibcood)

QEYBTA 1AAD Goobo-geli (20 dhibcood)

XAAJI AADAN AXMED XASAN (Xaaji Aadan Afqalooc)

Xaaji Aadan Axmed Xasan oo ku magac dheeraa "Afqallooc" waxa uu ku dhashay miyiga magaaladda Ceerigaabo goob loo yaqaan Haldhagan ee togga Mirashi qiyaas ahaan sanadkii 1871[dii]. Haldhagan waxa ay magaaladda Ceerigaabo dhanka waqooyi bari ka xigtaa ilaa 50 km.

Abwaanku waxa uu noolaa ku dhawaad qarni iyo rubuc. ALLAHA u naxariistee, waxa uu ku geeriyooday 5tii Luulyo 1986[dii] magaaladda Ceerigaabo ee xarunta Gobalka Sanaag, isaga oo markaa qiyaastii 115 sano jir ah.

Xaaji Aadan Axmed waxa uu ka dhashay qoys reer guuraa ahaa. Dhanka aabaha waxa uu ahaa ilmihii sagaalaad ee aabihii dhalo, dhanka hooyadana waxa uu ahaa curadkii bahdooda. Xaaji Aadan Axmed waxa hooyadii la odhan jiray Dahabo Dhuunkaal Dhegayare, aabihiina waxa uu ahaa nin aftahan ah oo golejoog leh. Axmed Xasan waxa lagu yaqaaney laynta shabeellada iyo libaaxyada dadqaadka ah.

Xaaji Aadan Axmed xilligii yaraantiisii ma jeclayn in uu xoolaha raaco, laakiin waxa uu jeclaa in uu dadka waaweyn ag-joogo oo warkooda iyo wacaalkooda dhuuxo si uu carro-edeg wax badan kaga ogaado. Abwaanku intii uu yaraa waxaa soo maray dhibaatooyin badan, laakiin waxa uu ahaa nin hoodo iyo ayaan leh oo markasta Allah ayaa ka samata bixin jirey dhibta. Abwaanku waxa uu ahaa nin Allah siiyey filweyni dheer, isla kolkaana intii uu noolaa waxa uu la kulmay turunturrooyin badan oo ay ka mid ahaayeen qafaalasho, xadhig sannado badan ah, dibadjoognimo, iwm, hase ahaatee dhammaan hadimooyinkaas wuu ka badbaaday.

Xaaji Aadan Axmed Afqalooc, isaga oo afar jir ah oo la jooga aabihii iyo hooyadii baa libaax qaatey. kolkii libaaxii la tagey meel cidla ciirsi le'ah buu iskaga tagey oo ma cunin. Labo maalmood ka dib markii uu halkaas yaaley isaga oo dhiigbaxay waxaa helay gabadh la joogtay adhi meesha ku soo foofay. Gabadhiibaa caano siisay isaga oo jidiin dhuubmay. Reerkii gabadha dhalay waxa ay wiilkii yaraa hayeen oo baxnaaniyeen saddex bilood. Intaas ka dib, waxa ay reerkii wiilka helay ka baafiyeen shir beeluhu isugu yimaadeen. Halkaas baa Xaaji Aadan Axmed Afqalooc reerkoodii dib loogu soo celiyay isaga oo laga quustay. Abwaanka waxa uu afku ku qaloocday habeenkii libaaxu qaatay:

1. Xaaji Aadan waxa uu dhashay
   B. 1871 T. 1879 J. 1917 X. 1877

2. Xaaji Aadan waxa uu ka dhashay qoys ah
   B. kaluumaysato, T. Maguurto, J. Reerguuraa, X. Reermagaal.

3. Xaaji Aadan waxa uu ahaa ilmihii kowbaad dhanka
   B. Aabaha, T. Abtiga, J. Edada X. Hooyada

4. Abwaan Xaaji Aadan waxaa lagu yaqaanay laynta
   B. Biciidka iyo sagaarada T. Waraabaha iyo dawacada
   J. shabeelka iyo libaaxa X. Maroodiga iyo goodirka

5. Xaaji Aadan xilligii uu carruurta ahaa ma jeclayn in uu
   B. guriga joogo T. xoolaha raaco J. ciyaaro X. safro

6. Abwaanku intii uu yaraa waxaa soo maray
   B. Farxado badan T. Ciyaaro badan
   J. Dhibaatooyin badan X. Dhagar badan

7. Xaaji Aadan isaga oo afar jir ah waxa qaatey
   B. Waraabe T. Shabeel J. Libaax X. Yixaas

8. Xaaji Aadan waxa helay oo caano siiyay
   B. Wiil geel la jooga T. Gabadh adhi la jogta
   J. Odey lo' la jooga X. Hooyo waxaro la jogta

9. Xaaji Aadan aabihii waxa uu ahaa
   B. Afgarooc T. Suldaan J. Afmaal X. hadal-mirgo

10. Xaaji Aadan hooyadii waxa la odhan jirey
    B. Dahabo Dhuunkaal T. Cawo Magan
    J. Shaqlan Warfa X. Doobiro Geelle

Suugaan (35 dhibcood): Dhameystir murtidan (10 dhibcood)

1. Gacmo wadajir bay_____
2. Geed waa madal _____ waa marag
3. Geed weyn _____yar baa goysa
4. Kur/kor waayeel waa _____
5. Ludaay is moodmoodeysa_____ka xiriirtaa

Ka jawaab waydiimahan (10 dhibcood)

1. Sheeg Abwaanka allifey riwaayadda shabeel-naagood?
2. Heesta Dhaqan waxa uu Abwaan Xasan Ganey ku sheegay magacyo roobku leeyahay, sheeg saddex ka mid ah magacyadaas?

U-kala saar murti iyo maahmaah (15 dhibcood)

1. Xidid wada yaal waa xil wada yaal
2. Barasho horteed ha i nicin
3. Xidid xeradii way isku furantahay
4. Ciirtaada dhammaa ceebtaada yaqaan
5. Deriskaagu waa ilaalo aan laguu diran

NAXWE (25 dhibcood):
Ka soo saar magaca gaarka ah ee ku jira weedhahan (15 dhibcood)

1. Ardayda akhriska ku wanaagsan waxaa ka mid ah Hodan
2. Muqdisho waa magaalo-madaxda Soomaliya
3. Aadan Cade waa madaxweynihii ugu horeeyay ee dalka
4. Maxkamaddu way xidhan tahay
5. Axmed waa macalin wanaagsan

Keen ereyadan ereyo la macno ah (10 dhibcood)

1. Qaansa roobaad
2. Tabantaabo
3. Milgo
4. Tukulush
5. Dhabbo

CURIS: Faa'iidada nabada (20 dhibcood)

Qoraalka 10-dhibcood, Erey bixinta 5-dhibcood, Astaamaha 5-dhibcood.

Ka qor mawduucyadan mid ka mid ah curis gaadhaya ugu yaraan 500 oo erey lehna dhammaan astaamaha qoraalka:

1. Xuquuqda waalidka
2. Barbaarinta caruurta

DHAMMAAD